



Update on SE Enrollment and Program Balancing Phase 2 Recommendation

Bulshada Qaaliga ah ee PPS:

Maanta oo bishu tahay Abriil 29, Guddoomiye-xigeenka Waxbarashada Claire Hertz waxay siidaysay [tallo-bixinteedii](#) Wajiga 2aad ee Barnaamijka Dheelitirka iyo Diiwaangalinta Koonfur-bari, tallo-bixintaasi oo saameyn ku yeelen doonta 20 dugsi oo ku yaala Koonfur-bari(SE) laga bilaabo **Dayrta sanadka 2023**. Tallo-bixintaas waxay ku dhisan tahay shaqada ay qabteen Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari ee magaalda Portland, kuwaasi oo u soo bandhigay todobaadkii la soo dhaafay warbixintoodii ugu [dambaysay](#).

Ku-xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada Claire Hertz waxay kala hadli doontaa tallo-bixinteeda Golaha Waxbarashadu bisha Maayo 10keeda, iyada oo ay u codeyn doonaan Goluhu Maayo 24keeda kaasi oo ah go'aankooda ugu dambeeya.

Xubnaha bulshadu waxaa lagu dhiirigalinayaa inay ka soo bixiyaan aragtidooda ku saabsan tallo-bixinta iyada oo kulan albaabadu u furan yihiin lagu qabanayo [Makhaayada Dugsiga Sarre ee Franklin Maayo 5teeda saacadaha 6:00 habeenimo ilaa 8:00 habeenimo](#).

Xaggan hoose waxaad ku arki isbedelada suurtagalada ah ee la sameyn karo:

- Harrison Park K-8 waxaa loo bedeli doonaan dugsi dhexe. Ardaydiisa hadda ee ah K-5 waxay wax ka baran doonaan dugsiga hoose ee cusub ee ku yaala dhismaha Clark (oo hadda hoy u ah Dugsiga Creative Science). Intaas waxaa dheer ardayda dariska ee Dugsiga Dhexe ee Harrison Park waxay ka koobnaan doonaan arday ka timaada Vestal iyo Atkison ee hadda wax ka barta, iyo ardayda Waxbarashada Labada Luqadood ee Shiinaha ku qaadata ee barnaamijka Harrison Park iyo Woodstock,
- Dugsiga Creative Science waxaa loo rari doonaan Bridger K-5 iyada oo la isku dari doona barnaamijyada dariska ee hadda ka jira.
- Barnaamijka Isbaanishka Waxbarashada Labada Luqadood Lagu Qaato ee Bridger waxaa loo rari doonaan Lent K-5, kaasi oo noqon doono dugsi dhammaan waxbarashada lagu qaato Isbaanish isaga oo dammaanad qaada in loo oggolaado inay wax ka bartaan ardayda dariska Lent kuwaasi oo waxbarashada Isbaanishka ku qaadan ee halkii waxbarashada ku qaatay Marysville K-5.
- Qorshaha la soo jeediyey wuxuu u bedeli doonaan dariska dugsiga Woodstock iyo qeyb ka mid ah dariska Sellwood inay waxbarashada ku qaataan Lane, iyaga oo xoojinaya isdiiwaangalintooda aadka ugu yar dugsiga dhexe ee gobolka. Isbedelada dheeraadka ah ee xuddudaha waxaa qeyb ka noqonaya Woodstock, Lewis, Arleta, Marysville iyo dugsiyada hoose ee Glencoe kuwaasi oo kordhin doona diiwaangalinta dugsiyada hoose ee Creston, Vestal, Whitman iyo Woodmere. Isbedeladani waxay caawin doonaan inay

daboolaan baahiyaha ugu yar ee diiwaangalinta ee la higsanayo iyo inay bixiyaan barnaamijyo badan oo tayo leh.

- Dugsiga Dhexe ee Kellogg, kaasi oo sanadkani la furay, waxaa sidoo kale lagu arki doonaan isbedelada soo jeedinta. Inta badan oo la iskugu geeyo Kellogg waxay ka mid noqon doontaa qeyb ardayda nawaaxiga ee wax ka baranaysa iyo in barnaamijka Waxbarashada Labada Luqadood Lagu qaato ee Isbaanishka Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor dib loogu soo raro Kellogg, iyada oo meel la iskugu keenayo hal dugsi dhexe dhammaan Waxbarashada Labada Luqadood Lagu Qaato ee gobolka. Kellogg wuxuu noqon doonaa dugsi ballaaran marka lagu sookordhiyo, sidaas darteed soo jeedinta sidoo kale waxay dugsiga Creston dariskiisa u rari doonaan Kellogg iyo inay ardayda wax ka barata nawaaxiga Hosford. Waxaa ay u muuqaataa in Kellogg wali leeyahay diiwaangalinta ugu fara badan dugsi dhexe ee gobolka, kaasi oo ahaa walaaca ay qabaan guddida SEGC.

Marka ay Golaha Waxbarashadu go'aamiyaan isbedelada, qorsheyntu waxay bilaabi doontaa sidii loo xaqiijin lahaa gaadiidka ay mustaqbalka ardaydu raaci doonaan, shaqaaleysiinta iyo gargaarka bulshada iyo baahiyaha kale ee meel marinayo sidii ay diyaar u noqon lahaayeen bilowga sanad-dugsiyeedka 2023-24.

Isbedelada xudduuduhu waxay ku bilaabmi doonaan xannaanada caruurta, fasalada 6aad iyo ardayda cusub ee kale Dayrta sanadka 2023. Ardayda kale waxaa loo oggolaan doonaa inay sii joogaan dugsiyadooda hadda ay wax ka bartaan ilaa ay gaarayaan fasaladooda ugu sareeya. Dhaqaajinta barnaamijku waxay dhici doonaan isla hal mar, iyada oo dhammaan fasalada oo dhan ay u wada guuri doonaan goobo cusub Dayrta 2023.